# Macallimiinta Franklin ee Mercedes Munoz, Anne McHugh oo ku guuleystay abaalmarino

Laba macallin oo ka tirsan Dugsiga Sare ee Franklin ayaa ku guuleystay abaalmarino muhiim ah oo loogu talagalay adeegooda ku aadan ardayda. Mercedes Munoz waxay ku guuleysatay Abaalmarinta Macallinka Sanadka ee Gobolka iyo Oregon iyada oo Anne McHugh ay ku guuleysatay Abaalmarinta Madaxtinimo ee Hal-abuurnimada ee loogu talagalay Pacific Northwest oo ka socota Hay'adda Illaalinta Deegaanka.

**Macallinka Sanadka ee Gobolka iyo Oregon:** Munoz, oo ah Macallinka Waxbarashada Gaarka ah, oo 12 sano soo ahaa macallin ayaa helay maamuuska gobolka, oo la helo abaalmarin dhan $500. Waxaa lagu wargeliyay xulashadeeda markii ay si lama filaan ah intii lagu jaray fasalka Arbacada ugu yimaadeen Maamulaha Franklin Chris Frazier iyo Joe LaFountaine, Ku xigeenka Kormeeraha Guud ee Goobta ee PPS ee Dugsiyada Sare.

"Waxaad tahay tusaalaha wanaagsan ee macallimiinta dadaalaysa ee Oregon," ayay Colt Gill, oo ah Agaasimaha Waaxda Waxbarashada, ku qortay warqadeedii abaalmarinta. "The Blue Ribbon Panel oo ay fududeysay Multnomah ESD waxaa dhiirigeliyay dadaalkaaga adag ee waxbarashada iyo hoggaaminta maalin kasta ee dadaalada sinnaanshaha dugsiga."

Munoz ayaa horseed ka ahayd dadaalka Waxbarashada Gaarka ee Franklin tan iyo 2014-kii waxayna ku caan tahay maareynta fasalka iyo awooda la iskugu xirmo ardayda. Iyadu waa hoggaamiye shaqaale oo ku tirsan kooxaha dhanka sinnaanshaha iyo horumarinta xirfadeed, waxayna aad u isticmaasha macluumaadka marka ay noqoto go,aan qaadashada.

"Shaki la'aan, iyada waa xubinta kooxda ugu adag ee aan haysano iyada oo qiime weyn ugu fadhida ardaydeena, shaqaalaheena, iyo guud ahaan bulshadeena Franklin," ayay saaxiibadeeda ah macallinka Waxbarashada Gaarka ee Franklin, Andy Clark, ku qortay warqadeedii magacaabista. "Mercedes waxay si joogto ah u qabataa shaqo dheeraad ah oo ka baxsan waxa looga baahan yahay macallin iyada oo aan marnaba codsan aqoonsi la siiyo ama mahadcelin la xiriirta shaqooyinka badan ee ay iyadu bilawdo maalintii la joogaba."

Ku guuleysiga ay ku guuleysatay maamuuska gobolka, Munoz waxay noqotay in ay u soo baxdo kaalinta u dambeysta ee Abaalmarinta Macallinka Sanadka ee Gobolka iyo Oregon ee 2020-ka. Abaalmarinta gobolka, oo ay bixiso ODE iyada oo lala kaashanayo Bakhtiyaanasiibka Oregon, waxaa ku jira $5,000 oo hadiyad ah oo la siiyo qofka guuleystay, $5,000 oo kale oo la siiyo dugsiga qofka guuleystay, oo ay dheer tahay lacag lagu daboolayo kharashyada safarka ee qofka guuleystay ee loogu talagalay sanadka.

Abaalmarinta gobolka, oo la soo bilaabay 1955, ayaa muddo afar jeer ah la siiyay macallimiinta Dugsiyada Dadweynaha Portland, iyada tii u dambeysay 2018-kii la siiyay Matthew Bacon-Benes oo ka tirsan Dugsiga Dhexe ee Mt. Tabor.

**Abaalmarinta Madaxtinimo ee Hal-abuurnimada ee EPA:** McHugh, oo sanadkan dhigaya Sayniska Deegaanka iyo Physics-ka, ayaa helay abaalmarin lagu aqoonsanayo macallimiinta (waxbarashada deegaanka ku dara fasalladooda iyo hababka ay wax u baraan." Waxay iyadu heli doontaa abaalmarin dhan $2,500 halkaasi oo ay sii kordhisan karto horumarinteeda xirfadeed ee dhanka waxbarashada deegaanka (waxay qorsheynaysaa in ay kordhiso xirfadaheega dhanka barnaamijka kambiyuutarka 'coding' iyo horumarinta microbiology/bioinformatics CTE ee la kala dooranayo), iyada oo Franklin ay heli doonto $2,500 si ay ugu maalgeliso hawlaha iyo barnaamijyada waxbarashada deegaanka.

McHugh waxay sanadkeedii horreeyay joogtaa Franklin ka dib markii ay wax ka soo dhigtay Dugsiga Degmada Beaverton. Waxay sheegtay in ay waxa ay doortaan ardaydeeda uu yahay hagaha waxa ay baaritaanka ku sameeyaan fasalka dhexdiisa, iyada oo habka ay u wajahayso uu yahay in ay wax ka qabato su'aalaha ay iyada ama ardaydeedu midkoodna garanaynin sida looga jawaabo.

Sanadkani, ardayda iyadu leedahay ee Sayniska Deegaanka ayaa ka shaqeeyay nidaamka beerista dhirta ee ciida 'desktop hydroponics' si u ogaadaan sida qaybaha kala duwan ee silsiladda cuntada midba midka kale u saameynta ugu yeesho, taasi oo cilmi-baarista la sameeyay iyada oo lala kaashanayo cilmi-baarayaasha NASA. Ardaydu waxay natiijooyinkooda iyaga oo meel ka fog jooga u soo bandhigo doonaan saynisyahanada Xarunta Cilmi-baarista Ames ee NASA.

"Waxaan doorbidaa waayo-aragnimo gacmaha wax laga qabanayo," ayay sheegtay ardayada Vanessa Pizzuto. "Waxaan oran karaa '*Waan* sameeyay tani. *Waxaan* kalluunka ka dhigay mid nool! Marka xiga waxaa jeclaan lahaa in aan fiiriyo algea.'"

McHugh waxay sheegtay in ay rajeynayso in ay abaalmarinta dugsiga ee dhan $2,500 u isticmaasho cilmi-baarista sifeynta biyaha wasakhda ah 'aquaponic' iyo iskaashiga lala yeelanayo NASA iyada oo qayb ka ah fasallada Biology ee Heerarka Sayniska ee Jiilka Xigga 'Next Generation Science Standards Biology' ee ay dhigi doonto sanad dugsiyeedka soo socda.

"Aad ayaan ugu faraxsanahay in awooda in aan si dheeraad ah u bixiyo fursadaha waxbarashada dhanka deegaanka oo loogu talagalay ardayda ka tirsan Franklin iyo guud ahaan PPS," ayay sheegtay.